

# Lacagta khidmadda bukaanka

Baaritaan qaadis.....	0 kr
Booqasho xarunta xaaladaha degdegga ah.....	400 kr
Booqasho xarun caafimaad iyo isbitaal.....	200 kr

- Uma baahnid in aad lacag dhiibto haddii aad ka yartahay 20 sano ama haddii aad buuxiso 85 sano.
- Wuxaad bixineysaa isla qiimaha booqashada la ballansado, xitaa haddii ay booqashada ku dhacdo qaab fogaan arag (chaatt, telefoon, ama muuqaallada layska waco).
- Booqashooyinka qaar waa lacag la'aan, tusaale ahaan raajada naasaha iyo booqashooyinka xarumaha caafimaadka ee hooyada iyo dhallaanka.

## Iska baaji booqashada haddii aadan imaan karin.

Wuxaad u baahantahay inaad baajiso booqashadaada ugu dambeyn 24 saacadood ka hor waqtiga aad ballansatay, haddii kale waxaa lagaa qaadayaa lacag khidmad ah oo dhan 400 karoон. Tani waxay xittaa khusaysaa booqashooyinka aan lacagta lagu qaadin.

## Xakamaynta kharashka badan iyo kaarka lacag-la'aanta.

Waxaa jira xad go'an oo laguugu talagalay inta aad ku bixin karto booqashooyin muddo 12 bilood ah. Waxaa la dhahaa xakamaynta kharashka badan. Marka aad bixiso 1 450 oo karoон, dhammaan booqashooyinka waxay noqonayaan kuwo lacag la'aan ah ilaa 12 bilood laga joogo booqashadii ugu horreysay ee lacag lagaaga qaaday.

## Lacag dhiibid

Kaar ayaad ku dhiibi kartaa adiga oo isla goobta jooga ama warqad lacag sheegasho ayaad ku dhiibi kartaa. Waxaa soo raacaya lacagta warqadda lacag sheegasgada oo 50 karoон ah, haddii aad lacagta ku bixineyo qaabkaas. Shirkadaha qaar waxay ku siinayaan fursad aad ku bixiso adoo adeegsanaya Swish.

## Waxyabo dheeraad ah

Lacagaha khidmadaha waxay dhaqan galayaan laga bilaabo 1-da bisa Janaayo ee sanadka 2025, waxayna khuseeyaan dadka ku diiwaan gashan Iswiidhan ama haysta kaarka EU.

*Haddii aad shaki ka qabto inta lacag ay booqashadaadu ku kacayso, waxaa ka akhrisan kartaa maclumaad dheeraad ah 1177. se/skane/avgifter-skane ama waxaa la hadli kartaa shaqaalaha caafimaadka.*



Warbixin dheeri ah ka akhriso  
1177.se/skane/avgifter-skane